Sookoobidda buugga: Seeska Dhaqaalaha

ARAR

Buuggani wuxuu si kooban oo aan kala tag lahayn u soo bandhigayaa afkaartii iyo aragtiyihii ay curiyeen culimada cilmiga dhaqaalaha gadhwadeenka u ahi; waa aragtiyo mug iyo miisaanba ku leh nolol maalmeedka basharka oo dhan, adduunkana wax badan ka beddeley. Buuggani wuxuu isku deyayaa in uu si kooban u sharraxo afkaarta seeska u ah cilmiga dhaqaalaha.

Aqoonta dhaqaaluhu waa dhuuxa iyo lafdhabarta shay kasta , wax walba oo adduunkan saaranna dhaqaaluhu wuu ku sidkan yahay . Masruufkaaga , barashadaada, iyo mawdkaabgaba waxaa ku lifaaqan qayb ka mid ah dhaqaalaha. Cilmiga dhaqaaluhu wa mid ku lammaan dhammaan laamaha kale ee aqoonta , oo waxa aynnu si kooban u odhan karnaa cilmiga dhaqaaluhu waa xabagta isu haysa nafta iyo nolosha. Waa cilmi fahamkiisu nolosha lama huraan u noqday, si isku mid ah ugu baahan yihiin madaxweynaha dalka iyo shakhsiga danyarta ahi.

C**utubka 1aad: wacyi dhaqaale**

Illaahay markii uu insaanka iyo noolaha kale oo dhan abuurey wuxuu ku rakibay wacyi uu ku kala saaro dhibtiisa iyo dheeftiisa. Wuxuu sidoo kale illaahay garaad siiyey sankuneefle walba halka iyo habka uu manaafacaadka iyo macishadiisa u raadsanayo. Noole walba wuxuu siiyey garasho ku filanoo uu ku baadigoobo habka iyo hannaanka uu wuxuu ku noolan lahaa u helayo,wuxuuna Rabbi u dhammmeystiay agabkii uu noloshaiisa ku maarayn lahaa.

Marka aynnu ka hadlayno wacyi dhaqale waxaynnu ula jeednaa baadi-goobidda manaaficda shakhsiyadeed e la xidhiidha dhaqaalaha iyo dhaqashada oo insaanku si caqli ah u raadinayo. Taas macnaheedu waxa weeye in insaanku uu yahay

caqlaani isu geynaya dhammaan macluumaadka iyo xogaha lagama maarmaanka u ah ka hor inta aanu qaadan go'aan dhaqasho iyo dhaqaale.wuxuu insaanku ururiyaa macluumaadyo isaga oo lafaguraya xogo xaglo badanleh oo hadafkoodu yahay in uu gaadho go'aan dhaxal gal ahoo dheef laga helayo ama dhib la iskaga moosayo. Wuxuu miisaamaa hawl hallabadkeeda iyo faa'idadeeda , sidaas darteed ayey dhaqaaleyahannadu insaanka ugu magacaabeen noole dhaqaale yahan ah (Economic man).

1.1: **Ahmiyadda barashada cilmiga dhaqaale leeyahay**

Dhawrkii qarni ee u dambeeyey cilmiga dhaqaaluhu wuxuu ka mid noqday culuumta halbowlaha u ah nolosheenna , waa cilmi xagal kasta oo nolosha ka mid ah taabanaya oo weliba saamayn weyn oo togane iyo tabane ahba ku leh . Sidaas darteed ayuu Bill Clinton hal-ku-dheggii ololihiisa markuu ahaa musharaxa madaxweyne 1992 uga dhigay " It's economy stupid".Noloshan casriga ahina waxay cilmiga dhaqaalaha u yeeshay ahmiyad gaar ah, wuxuu ku faafay laan walba oo culuumta ka mid ah . Bal u fiirso jaamacadaha iyo culuumta lagu derso qaybeheeda kala duwan farac kasta waxaa ku lammmaan maaddo ku saabsan cilmiga dhaqaalaha. Mashruuc kasta oo loo hollado hawlgelintiisa waxaa jaangoynaya dhaqaalaha loo hayo inta ay le'eg tahay dheefta laga rajaynayo ; hal-abuur kasta oo ganacsi waxaa halbeeg u ah dhaqaalaha la geliyey iyo midka ka soo xaroooday xaddiga uu le'eg yahay.waxaynu odhan karnaa adduunkan maanta lagu nool yahay mastarada cabbirkiisa lagu jaangooyaa waa dhaqaale, sidaas ayuu koboca dhaqaale, wershadaha iyo wax soo sarka ganacsi uu maanta u yahay halbeeg lagu cabbiro hodantinimada dad ama dal leeyahay.waxyaabaha uu sahlay in uuu cilmiga dhaqaaluhu sidaas u faafo, hawlkasta oo la qabanayaa halbowle u noqdo ayaa waxaa lagu fasiraa in cilmigani yahay mid deraaseeya hab-dhaqanka qofka, qoyska iyo qaranka. Ila soco oo kuma odhan cilmi deraaseeya hantidaada ee waxaan ku idhi hab-dhaqankaaaga , Haa waa cilmi hab-dhqankaaga dhaqaale deraaseynaya , sidaas darteed bay waxyaalaha uu xoogga saarayo ay ka mid yihiin:

· Nolosheenna iyo fasiriddeeda si guud , si gaar ahna qaybta la xidhiidha dhaqshada iyo dheef raadinta

· Inoo sahlaya in aynnu fahamno caalamkan innagu xeeran iyo habka uu isula falgalo gaar ahaan dhinaca wada-noolaanshaha iyo wax iswaydaarsiga bulshooyinka

· Inoo fasirayaa musdanbeedka dhacdooyinka kala duwan ee addunkan ka dhacaya , tusaale ahaan duullaankii gumeystuhu Afrika ku qaaday qarnigii la soo dhaafay dantiisu maxay ahayd? Dadkii asalka ahaa ee reer Maraykan maxaa loo gumaaday? Maxaa keenay in Latin Ameerika Af Isbaanish ku hadasho iyaga oo aan Latin Ameerika iyo Isbayn wax ab iyo isir toonna ka dhexayn?

· Wuxuu ina fahamsiinayaa isdiidooyinka danaha kala duwan iyo dunta isku haysa ee dhaqan dhaqaale, dhammaantoodna ay salka ku hayaan manfaco la is dhaafsanayo. Bal u fiirso sida Maraykanka iyo Shiinuhu mar kasta dhebilisasho afka ah isu dhaafsanayaan isaga oo mid kastaa ku gooddinayo in uu weerar qaadayo , ka kalena weerar celis ugu war celinayo , waxna iskuma sameeyaan! Sababtaas ma fahamtay? Sirtu waa kale maarmi la'aanta dhaqaale oo midba midka kale ku qasban yahay dhaqaale ahaan iyo wax iswaydaarsiga ka dhexeeya.

· Ifafaalo ka bixinta iyo halka ay ku dambayn doonto ummadda aan dhaqaale iyo dhaqsho lahayni ama si girracan u maareynta khayraadka ay haysato .tusaale ahaan muddooyinkii u dambeeyey wuxuu Shiinuhu bilaabay in uu la wareego dekedo badan oo dalal kale leeyihiin isaga oo qodobkan ka dabqaadanaya.

Cilmiga dhaqaaluhu wuxuu ka hawlgalaaa aag walba oo la xidhiidha dhaqasho iyo dheef raadin. Si gaar wuxuu cilmigani u lafouraa:

Lacagta: waa aagga ugu muhiimsan ee aqoontani isku hawsho u jidbixinteeda iyo jihaynteeda. Cilmiga dhaqaaluhu wuxuu ina barayaa lacagtu waxay tahay, heerarka ay soo martay iyo habka ugu waangsan ee loo maarayn karo. Lacagta waxaa sida caadiga ah xukuma dawladd sidaas darteed hagidda iyo hannaan fulineedkeedaba waxaanku baraya cilmiga dhaqaalaha . waxay dawladdu gacanta ku haysaa xaddiga lacageed ee la daabacayo , xoogga qiimaha lacageed iyo maaraynta xawaaraha lacagta suuqa ku jirta , waxay sidoo kale dawladduhu isku hawlaan maaraynta xaddiga lacageed ee suuqa yaalla iyo in aan lacago kale oo aan dowladdu ogayn ama oggolayn suuqa la soo gelin iyada oo raacaysa hannaan siyaasadeed oo la yidhaahdo" siyaasadda maaliyada". Waxay

siyaasaddani dowladaha u sahlaysaa in ay mar kasta kormeeraan suuqa , sicirbararkana sii sahamiyaan intuusan suuqa soo gelin ka hor , markuu sicirbarar dhacana in ay si fudud u samatabixin karaan dhaqaalaha dalka.marka uu cilmiga dhaqaaluhu ka hadlayo aagga lacagta wuxuu diiradda saaraa dakhliga , kaydka iyo kharashaadka qof , qoys ama qaran lee yahay.

Korodhka iyo koboca (growth and development): waa aaggga labaad ee aqoontani faallayso. Korodhk waxaynnu ula jeednaa tirada shayga oo siyaadda. Si kale haddii aan u djigno waa wixii aad haysatay oo xaddi ahaan bata , halka kobocu uu yahay xaddigii aad haysatay oo xajmi ahaan kuu bata. Tusaale ahaan waxa aynnu leenahay adhigii reer warfaa wuu kordhay oo tiro ahaan ayuu u badtay, halka sabeentii ina Daylo ay kobocday oo ah in ay naaxday. Qaybtani waa farac ahmiyaddisa leh marka la lafagurayo horumarka dhaqaale ee dal sameeyo muddo cayiman. Wuxuu sidoo kale cilmiga dhaqaaluhu xoogga saaraa kaabayaasha dhaqaale iyo gucummada ka qaybqaata horumarinta dhaqaale , sidoo kale diiiradda waxaa cilmiga dhaqaalaha lagu saaraa isu dheelllitirnaanta dhaqaale ee dal korodh iyo koboc ahaan, iyo sida ay bulshada qaybaheeda kala duwani uga faa'ideystaan korodhka iyo koboca dhaqaale ee dal sameeyey.

Hantida danta guud: cilmiga dhaqaaluu wuxuu hantida danta guud u yaqaannaa wax walba oo hanti ah amah anti ahaan loo aglooli karo taas oo aan shakhsi gaar ahi lahayn, hase yeeshee, ka dhexaysa bulsho ku nool dhul xad iyo xuduud leh. Wuxuu cilmiga dhaqaaluhu iska taxallujiyaa in hantida danta guud loo maamulo habka ugu wanaagsan .

Dhaqaalaha dowladdaha: Waa farac uu cilmiga dhaqaaluhu si gaar ah u deraaseeyo , dhowrkii qarni ee u dambeeyeyna horumar baxaad weyn la=ehna laga sameeyey. Wuxuu faracani deraaseeyaa xidhiidhka dhaqaaale ee dhex mara dowladdaha kala duwan iyo dowlad kastaa heerka ay ka marayso sallaanka dhaqaale. Si kooban wuxuu faracani xoogga u saaraa dhaqaalaha caalamka iyo marba jihada uu ku wajahan yahay. Wuxuu sidoo kale diiradda saaraa ganacsiga u kala goooshaya daafaha adduunka dacalladiisa iyo saamaynta uu ku lee yahay koboca dhaqaale ee dal gaar ah. Xidhiidhka diblomaasiyadeed waddamada kala duwan u dhexeeyana waxaa inta badan lagu jaangooyaa maslaxadda dhaqaale iyo heerka wax iswaydaarsi xajmi iyo xaddi aaanba inta uu le'eg yahay.

1.2: **ma jirtaa mushkilad uu cilmiga dhaqaale xal u raadiyo?**

Haddi aynnu su'aashan sare toos u abbaarno waxaynnu leennahay Haa oo adduunkan inta la saran yahay mshkilad dhaqaale way jirtaa wayna jiri doontaa. Mushkilad dhaqaale waxa aynnu ula jeednaa in ay jirto caqabd gaar ah oo cilmiga jiritaankiisa caqabad ku ah taas oo uu xal iyo Daawo u raadiyo. Waxaynnu leennahay mushkilad dhaqaale way jitaa oo cilmigan jiritaasnkiisuba wuxuu ka askumay xal u helidda mushkiladaas. Caqabadda uu cilmigani xal u raadinteeeda mar kasta ku foogan yahay waxa lagu magacaabaa " naadirnimo khayraad" . waxaynnu naadirnimada khayraadka ula jeednaa in khayraadka la heli karo ay xadidan yihiin , halka baahiyaha basharkuna aanay xad iyo xuduud laayn, taas oo ay ka dhalatay mushkiladda kala doorashada ee qofku, qoysku ama qaranku uu mar kasra ju hawllan yahay in uu kala doorto baahiyahaas badan midooda uu hor daboolayo isaga oo khayraadka xaddidan ka daa'idaysanaya.

Mushkiladaha uucilmiga dhaqaaluhu xal u raadiyo waxaa lagu soo koobi karaa:

Ø Naadirnimada khayraadka (scarcity resource): taas oo ah khayraadka suurto galka ah ee la heli karo ay xaddidan yihiin.

Ø Kala doorasha (trade off) : waa isirka labaad ee mshukiladda dhaqaalaha ugu saamaynta badan. Maalin kasra wuxuu qofku qaadanayaa go'aamo uu ku kala dooranayo labo shay ama wax ka badan.

Ø Fursad-huridda (opportunity cost): waa udub dhexaadka cilmiga dhaqaalaha . fursad-hurid waxa aynnu ula jeednaa haddii aynnu dooranno in aynnu badeecad gaar ah soo iibsanno ama soo sarno , khiyaarka labaad ee ah in aynnu badeecad kale soo iibsan karno ama ku soo saarano dakhli intee le'eg ayeynu ku waaeynaa ama kharash intee le'eg ayaa innoo baaqanaya. Si kooban fursad-huriddu waa qiimaynta go'aanka aad ka tagtay haddaad qaadan lahayd maxaad dheefi lahayd ama dheef intee le-eg ayaa kugu dhaaftay marka loo barbardhigo madika aad qaadatay.

jiho kasta oo aad u dhaqaqdid waxaa ku jaangoynaya awooddaada dhaqaale. Hawl kasta oo la qabanayo waxaa ubuc u noqday cilmiga dhaqaalaha , waa cilmi

hagaya habka aynnu u dhaqmayno oo dhan. Waa ay adag tahay in go'aan la gaadho nooca uu doono ha noqdee , mid siyaasadeed , mid bulsho, cashuur dowladeed, beereed ama mid ganacsi iyada oo aan aqoon dhammmaystiran ama xog buuxda an laga hayn xaaladda dhaqaaale ee markaas taagan.

CUTUBKA:2aad: **Waa maxay cilmiga dhaqaaluhu?**

Cilmiga dhaqaaluhu waa aqoon lagu deraaseeyo habka ay ashkhaas iyo bulshooyinku u gaadhaan go'aammada marka ay ku gudo jiraan kala doorashada khayraadka xaddidan ee suurogalka u ah in ay helaan.

Cilmiga dhaqaaluhu waa cilmi ay qaamuusyada AF-Soomaaliga badankoodu ku fasireen in uu xambaarsan yahay saddex macno midkood uun:

1) Hanti
2) Habka hantida loo maaamulo
3) Aragtida wax soo saarka iyo hanti qaybinta

Ereyga Economics oo asalkiisu ka soo jeedo Af Giriiggii hore ayaa waxa uu ka kooban yahay labo eray oo la isku sidkay (Economicus (oikos iyo nomos) kaas oo micno ahaan tilmaamaya habka aqalka loo maamulo.

Soomaalidii hore oo dhaqashada iyo dheefsashada khayraadka ay haysteen oo xaddidan aad ugu xeel dheerayd ayaa waxay ku maahmaaheen " Saddex baa rag ugu liita : ma tashade , ma toshe iyo ma tashiishe".

Maahmaahdani waxay si kooban oo gundheer u tilmaaamaysaa saddexda dhardhaar ee cilmiga dhaqaaluhu ku taaagan yahay kuwaas oo kala ah : talo, tacab iyo tashiil.

CUTUBKA 3aad: Shaacsane bulsho iyo soo shaac bixii suuqa

Adam smith ayaa 1759) ka hor inta aanu soo saarin buuggisa caanka ah ee “The Wealth of Nation “ ayuu waxa uu soo saaray bug la yidhaahdo “ The theory of moral sentiments” oo uu ku sheegayo in wax kasta oo basharku iswaydaarsado uu ku dhisan yahay danaysi shakhsiyadeed iyo raadin manfaco qof walba isaga khaas u ah , qof kastana wuxuu u xaglinayaa in uu dantiisa gaarka ah gaadho , aragtidan oo loogu wanqalay “ aragtida danaysiga shakhsiyeed” ayaa waxay gundhig u noqotay afkartiisa dhaqaale. Waxaa isna sidoo kale odhaah isla macnahaas xambaarsan Adam Smith gu’yaal badan uga horreeyey Imaamul Qasaali ku sheegay kitaabkiisa caanka ah ee الـ ديـ ن عـ لوم أحـ ياء . Marka cilmiga dhaqaalaha la joogo raadinta iyo haqabtiridda danta gaarka ahi waa shaacsane bulsho oo la isla wada ogggolyahay insaanka waxaa ku rakiban dabci ah in wixii uu haysto ee aanu u baahnayn isticmaalkeeda uu dhaafsado wax ka maqan kaas oo uu u baahan yahay. Imaam al-Shaadibi wuxuuba leeyahay ma dhici karto qofku in uu shay iska bixiyo iyada oo aanay jirin wax uu dhaafsiisanayaa, hawl kasta oo uu qabanayana wuxuu ka fiiriyaa dhinaca maslxaddiisa shakhsiyeed.

Wax iswaydaarsigu wuxuu weligiis ahaa dhufsanayare basharka oo dhan ka dhexeeya. Manaafacaad iyo dheef isdhaafsiguna waa barta uu suuqa ganacsiga iyo cilmiga dhaqaaluhu ka bilowday.

CUTUBKA: 4aad**: Curashadii cilmiga dhaqaalaha**

Aqoonta iyo xirfaddda wax dhaqashada iyo dhaqaalaysigu waa mid guun ah oo ka ab ka ab insanku kala dhaxlayey. Xeeladaha iyo xirfaddaha wax loo dhaqdo laguna dhaqaalaysto waxay mar kasta isla beddelayeen casriga la joogo iyo duruufihiisa. Cilmiga dhaqaaluhu waa aqoon ka dabqaadata xirfaddihii iyo xeeladihii uu basharku jiila jiil ka dhaxlayey ilaa Xaawo iyo Aadan iyo heerarkii kala geddisnaa ee la soo maray. Culimada cilmiga dhaqaaluhu markay kala dir-

soocayaan heerarkii iyo nidaamyadii kala duwanaa ee insaaku wax u dhaqan jirey waxay u qaybiyaan dhawr marxaladood oo insaaku soo maray. Waxay dhqaaleyahanno badani aammisan yihiin in sooyaalka dhaqaale ee basharka oo dhan loo kala qaybin karo ugaadhsato , xoolo dhaqato, beeralay, wershadley iyo ganacsato oo ah marxallada aynu hadda marayno. Waxaa lagu doodaa in insaanku markii uu adduuunkan soo degay uu ka bibaalay nolosha marxaladda kowaad oo ah ugaadhsi. Waa marxalad aanu insaanku lahayn wax hanti ah oo meel u taal ama uu ku tashado , ee uu ku noolaaa wixii usoo ugaadhsado oo keliya. Marxaladda labaad ee uu taas uga gudbay waxay noqotay in uu xoolo nool insaanku rabbaysto oo dhaqdo si uu uga nasto ugaadhsigii, ka dibna wuxuu uga soo gudbay marxaladdaas in uu beero fasho , waana halka ay xaddaaradaha basharku ka bilaabantay ayaa la aaminsan yahay . wixii maxaladdaas ka dambeeyay wuxuu insanku u sii gudbay in uu daahfuro wershedo iyo ganacsiyo qaaradaha u kala goosha . markii la soo gaadhay heerkan wershedaha iyo ganacsiga ayaa waxaa bilawday dhawr nidaam oo ganacsiga bud-dhig u noqday kuwaasoo kala ah:

4.1. nidaamkii is-addoonsiga

4.2. nidaamkii danyar raratada

4.3; Nidaamki Hantigoosadka

4.3.1: madrasadii tujaarta- The mercantilist School

Qarnigan oo ku soo can baxay qarnigii siyaasadda dhaqaale iyo falsafadda akhlaaqeed (Age of [political economy and moral philosophy) ayaa wuxuu ahaa qarni ay doodaha ugu culus ee aqoonyahannada dhexdooda ka aloosan ay u badnaayeen kuwo ku saasan siyaasadda dhaqaale , akhlaaqda iyo anshaxa shakhsiga , bulshada iyo dawladda.

Madradii iyo madaahiibtii dhaqaale ee casrigan ugu caansanayd oo Mercantalisme loogu yeedhi jirey ayaa waxay ahad mad-habkii ugu caaansana wakhtigaas. Madrasadannidaamkeeda dhaqaale waxaa gundhig u ahaa afkaarta odhanaysa dawlad walba horumarkeedu waxa uu ku xidhan yahay sida ay ganacsigeeda iyo ganacsadaheeda u horumariso.

Madrasada Mercantalisme waxay ku caanbaxday in ay tahay madraso dhaqaalaha qaramaysa. Waa madrasad aamminsan in qaranka dhaqaalihiisa la kobciyo iyada oo la xakamaynayo in suuqa qaranka ay ganacsato ajaanib ahi soo gasho, maalgashiga in aan dalka dibbada looga saarin iyo in mar kasta badeecadaha qaranku waddamada kale u dhoofinaya ay ka bataan inta uu ka soo dhoofsanayo.

4.3.2: Madrasada physiocratics

Madrasadani waxay abuurantay kadib markii ay sii dabargo'aysay madrasadii ka horreysay ee Mercantalisme. Madrasadani ma ay hanaqaadin oo iyada oo aan la gardaadin ayey god-gashay. Waxay dabargo'aday markii uu 1776 Adam Smith faafiyey buuggiisa caanka ah , cilmiga dhaqaalahana seeska u noqday ee " The wealth of Nations". Casriga ay madrasadani soo shaac baxday waxaa caan baxay fekrad loogu yeedho " Laissez-faire". Waa fekrad ka duulaysa in qofka xadhkaha bulsheed ee ku xeeran lagu furo , halkuu doonona uu qofku maro habkuu doonana u dhaqmo. Physiocrats oo ka hanaqaaday faransiiska halqabsigeeduna ahaa " laissez-faire" waxay ahayd madraso ka soo horjeedda hab- dhaqankii danyar-raratada iyo mercantalisme. Waxay aad u diidanayd in ay dawladdu farogeliso ama xakamayso qofka xuquuqdiisa ganacsi iyo hab-dhaqankiisaba. Waxay ku soo begantay madrasadani wakhti ay dawladdu aad u xakamayso dhaqdhaqaaqa qofk iyo xataa dharka uu xidhanayo.

raggii horkacayey madrasadan muddadii yarayd ay jirtay waxaa ugu caansaan Franccois Quesnay iyo Anne Robbert Jacques Turgot oo labaduba aha reer Faransiis. Mabaadi'da ugu muhiimsan ee ay madrasadani u ololaynaysay waa:

§ Mabda'a Laissez-faire" mabda'ani wuxuu ka duulayey mafaahim odhanaysa dadka iyo hawlahooda ganacsi dawladdu faraha haka qaaddo. Dawladda shaqadeeda haku ekaato uun ee ah nabadgelyada iyo sugidda amniga , ee ganacsiga iyo heshiisyada dadku isla gelyaan yaanay dawladdu soo farogelin

§ Mabda'a dhiirigelinta beeraha iyo beeridda dhulka : madrasadani waxay aamminsanayd in beeridda dhulka iyo beeruhu yihiin barwaaqo-sooranka dhaqaale e bulshadu u baahan tahay.

§ Madrasadani waxay sidoo kale aamminsanayd in cashuuraha lagu waaajibiyo cidda dhulka iska leh oo keliya uun. Waxay ku doodaysay dheefta dheeriga ah ee dhulka iyo beeraha laga helo waxaa qaadansys mulkiilaha oo keliya sidaas darteed cashuurtaa waxaa laga qaadi karaa oo keliya cidda dhulka si rasmi ah u leh.

4.3.3. madrasada taqliidiga ah " The classical School

Madrasadani waxay bilaabantay 1776kii markii uu Adam Smith faafiyey buuggiisi " The wealth of Nations", waxayna dabargo'aday 1871 markii uu W.Stanley Jevos , Carl Menger iyo Leo Walras ay faafiyeen aragtiyaha la magac baxay " Neoclassical Theories". Madrasadani waa midii gardaadisay cilmiga dhaqaalaha ee ka dhigtay cilmi cusub oo ka madax bannaan culuumta kale ee bulshada. Madrasadan waxaa sidoo kale loo yaqaannaa madrasada dhaqaalha xorta ah " Economic Liberalism".

Mabaadi'da madrasadan gundhigga u ahaa ayaa waxaa lagu soo koobi karaa:

1: Dawladda oo faragelinta suuqa yaraysa

2: Kala danaysi

3: Isla falgalka masaalixda

4: Xeer dhaqaale.

Cutubka 5aad: Musdanbeedkii madarasada taqliidiga ah.

Madarasadani waxay ka dhex abuuran tahay bulsho kacdoon aqooneed iyo mid wershadeed ka dhex aloosan yahay. Waxay madrasadani kusoo begantay casri ay isbeddello waaweyn oo saddex-xagal ahi ka socdeen carriga reer Yurub. Kacdoonnadii saddex-xagalka ahaa ee ka aloosnaa Yurub wakhtigii uu cilmigan cusubi abuurmay waxay ahaayeen kacdoonkii cilmiga tajribada ee kawnka, kacdoonkii wershadaha iyo kacdoonkii dabqadda dhexe. Saddexdan kacdoon waxay gardaadiyeen aqoontii iyo waayo arragnimadii dhaqaale waxaanay ka dhigeen cilmi gaarkiisa u taagan.

Kacdoonkii cilmiga tajribada.

Qarnigii 17aad wuxuu kacdoonka cilmiga tajribada ee kawnka marayey meeshii ugu sarreysay. Waxa lagu tallaabsaday in qawaaniin badan oo kawni ah uu basharku daaha ka rogo isaga oo adeegsanaya agab cilmiyeed cusub iyo xeelado kale oo badan. Raggii udub-dhexaadka u ahaa kacdoonkii cilmiga tajribada waxaa ka mid ahaa Isxaaq Newton 1727 oo ahaa nin aad ugu caan baxay fasiraaada shaacsanayaasha kawniga ah. Waxa sidoo kale jiray rag badan oo ku xeel dheeraa cilmiga tajribiga ee kawnka iyo falsafadda oo wax yar Isxaaq Newton ka hor geeriyooday sida Galiilyo (1642) oo ahaa caalim Talyaani ah, faylasuufkii reer Faransiis ee Rene Decartes 1650) iyo faylasuufkii reer Ingiriis ee Francis Bacon 1632) oo lagu tilmaamo in uu yahay aabbaha ruuxiga ah ee manhajka cusubi ka shidaal qaato.

Kacdoonka cilmiga tajribiga ah ee kawnku wuxuu keenay in dib uu qeexid ugu sameeyo cilmigu waxa uu yahay iyo goormaa la odhan karaa waxani waa cilmi iyo ma aha midna.

Cutubka 6aad: Hormuudka cilmiga dhaqaalaha

Marka si guud loogu kuurgalo cilmiga dhaqaalaha waxaa la iskuwaafaqsan yahay in saddex nin ay yihiin udub-dhexaadkii iyo labeentii afkaaraha cilmiga dhaqaale ee dhumucda leh. Saddexdaa nin aragtiyahooda ayaa nidaamka dhaqaale ee maanta adduunka ka jiri dhidibbada u aasay sida la aamminsan yahay. Waxaynnu odhan karnaa saddexdan nin waxay cilmiga dhaqaalaha ugu jiraan booska uu caynku ugu jiro rarka iyo reerka geediga ah. Afkaarta cilmiga dhaqaalaha iyaga ayaa halbeeg dheelliga ka ilaaliya u noqday. Saddexdaa nine e aynnu udub-dhexaadka ku tilmaamnay waa Adam Smith, Karl Marx iyo John Maynard Keynes.

1: Adam Smith

cid kasta iyo cilmi walba waxa uu lee yahay cid loogu abtiriyo loona aaneeyo askumiddiisa iyo abaalkiisaba. Taariikhyannada ku foogan falanqaynta taariikhda cilmiga dhaqaalaha waxay isku waafaqsan yihiin in faylasuufkii reer Iskotland , Adam Smith (1723-1790) uu yahay aabbihii cilmiga dhaqaalaha iyo nidaamkii

hantigoosadka. Afkaarta uu Adam Smith saldhigga uga dhigay cilmiga dhaqaalaha ayaa waxaa lagu soo koobi karaa:

1: Maslaxadda shakhsiyadeed (self interest)

2: Kala habaynta hawlwadeennada (division of labor)

3: Dawlladu suuqa farogelinta haka yarayso (invisible hand)

2: Karl Marx

Faylasuufkii reer jarmal ee Karl Heinrich Marx (1818- 1883) ayaa la aamminsan yahay in uu yahay inka labaad ee ugu saamaynta badan afkaarta cilmiga dhaqaalaha. Farqiga u dhexeeya Adam Smith iyo Karl Marx ayaa ah mid dab iyo baasiin ah;waa laba nin oo lid isku ah. Waxa la odhan karaa waa kefedda labadeeda dacal ee miisaaanka dheelliga ka ka dhawrta. Wuxuu Karl Marx diiday afkaarta Adam Smith iyo mabaadi'diisa oo dhan. Karl Marx oo ahaa aabbihii kacdoonka nidaamkii hantiwadaagga, wuxuu aad uga soo horjeestay nidaamkii hantigoosadka. Afkaartiisa dhaqaale oo dhanna wuxuu gundhig uga dhigay mid lid ku ah afkaarta hantigoosadku aamminsan yahay. Dhabbada ay ku kala leexdeen aragtida Karl Marx iyo Adam Smith ayaa wuxuu yahay " isirrada waxsoosaarka maxaa asal u ah?". Wuxuu Karl Marx ku tegay in isirka waxsoosaarka asalka u ahi uu yahay shaqada shaqaaluhu qabanayo, isirrada kale oo dhanna ay yihiin taakuleeye. Afkaarta ugu dhumucda way nee uu Karl Marx seeska ug dhigay aragtidiisa ayaa waxay leedahay badeecad kasta oo suuqa la soo dhigo waxay leedahay labo qiime: qiimaha koowad oo ay u leedahay waxsoosaaraha; iyo ka labaad oo u leedahay isticmaalaha.

Wuxuu ku doodaa Karl Marx muruqmaalka dhididkooda iyo dheecaankoodu waa badeecadda ay suuqa keenayan si ay u dhaafsadaan wax dheef leh, loo shaqeeyuhuna waa isticmaalaha dhididka iyo dheecaanka xoogsatada. Hantiileydu waxay soo gataan badeecad qaydhiin si ay ugu beddelaan badeecad

caadi ah oo suuq leh. Sicirka shaygu wuxuu ka tarjumaya tacabka xoogsatadu gelisay shaygaas. Sidaas darteed haddii aanay labadan wax iswaydaarsanaya si caddaalad ah wax isu dhaafsan midkood ayaa dulman. Wuxuu doodiisa bud-dhig uga dhigay in hantiileydu ay si arxandarro ah u dulminayaan muruqmaalka masaakiinta ah iyaga oo aan faa'idada dhididkooda ka dhashay waxba ka helin. Wuxuu colaadin dusha ka saaray hannaanka waxsoosaarka iyo habka uu ula dhaqmo nidaamka hantigoosadku muruqmaalka danyarta ah.

3: John Maynard Keynes

John Maynard Keynes (1883-1946) wuxuu hormuud u yahay madraso magaciisa dambe sidata. " The Keynesian School". Madrasadani marka lagu dhereriyo madrasadaha kale ee dhaqaale xagga cilmi ahaaneed iyada ayaa ugu culus ayaa la aamminsan yahay. Madrasadani waxay curatay markii uu John Maynard Keynes 1936kii faafiyey buuggiisa caanka ah ee la yidhaahdo : The General Theory of Employment . Interest and Money". Waxaa la aamminsan yahay in uu yahay aabbaha cilmiga dhaqaalaha ee casrigan iyo ninkii dhidibada u taagay dhaqaalaha qaybtiisa guud (macro economy). Wuxuu John Maynard ku soo beegmay wakhti uu dhaqaalihii reer Galbeed hoos u dhac iyo hoobasho ku sugan yahay. Muddadii u dhexaysay dhammaadkii 1920 ilaa 1930 ayaa waxaa Maraykanka ka bilawday hoos u dhac iyo fadhiidnimo dhaqaale oo baahsan kaas oo u sii gudbay Ingriiiska, Kanada, Faransiiska iyo Jarmalka.

John Maynard isaga oo isku deyayaa in uu xal u helo kana gungaadho musdambeedka mushkiladda dhaqaale burbur ee ku habsaday reer Galbeedka 1930 ayuu wuxuu qoray buuggiisa aan kor kusoo xusnay. Wuxuu u tafaxaytay inuu ka warceliyo asbaabta dhabta ah ee keentay dhaqaale burburka baahsan ee dhammaaan waddamada reer Galbeedka ku habsaday. John Maynard Keynes waxaa la aamminsan yahay inuu yahay ninkii nidaamka hantigoosadka ah ka badbaadiyey galbasho iyo geeri. John Maynard Keynes wuxuu isku dayey in uu shaacsaneyaasha dhaqaalaha fadhiidka ka dhigay u kuurgalo, deraasayn gundheerna ku sameeyo. Wuxuu isweydiiyey habkee si cilmiyeysan loogu sharraxi karaa dhaqaale burburkan iyo shaqo la'aanta baahday? Isaga oo isku hawlaya in uu tafsiir iyo tilmaan sax ka bixiyo mushkiladdan ku habsatay reer

Galbeedka ayuu wuxuu sees ka dhigtay in uu wax ka beddelo afkaar dhardhaareedkii hantigoosadku hore ugu taagnaa. Adam Smith iyo raggii ka dambeeyey waxay dhaqaalaha sees uga dhigeen in suuqa dawladdu faraha kala baxdo, haddii uu dhiico yeeshana isaga ayaa isdheellitiraya. John Maynard Keynes afkaartaas ayuu wax ka beddelay isaga oo leh suuuqu ma awooodo in uu keligii isdheellitiro , sidaas darteed waa in dawlladu ay suuqa soo farageliso si ay dhiicada uga dhellitirto fadhiidnimada iyo burburka dhaqaalena ugu hortagto.

Cutubka 7aad: **Meesiyada cilmiga dhaqaale.**

Culimada cilmiga dhaqaaluhu waxay cilmigan u qaybiyaan laba farac oo kala ah dhaqaalaha guud (Macroeconomics) iyo dhaqaalaha hoose (Microeconomics)

1: Dhaqaalaha guud (macroeconomics)

Wuxuu faracani xoogga saaraa deraasaynta guud ee dhaqaalaha dal leeyahay. Wuxuu dhaqaalaha dalka oo dhan faracani u deraaseeyaa sidii hal xubin oo guud ah. Wuxuu si gaar ah u lafoguraa dakhliga muwaadiniinta, heerka shaqo la'aaneed iyo heerka sicirbararka ee dalka. Cilmigan wuxuu awooodda isugu geeyaa in uu diiradda saaro dhaqaalaha dawladda iyo isirrada saamaynta ku leh. Wuxuu dhaqaalaha guud jidbixin iyo jawaab u raadiyaa su'aalo badan oo ay ka mid yihiin:

1: Sidee baynu ku ogaan karnaa in dhaqaalaha dalkeeennu kobcayo sannnadba sannadka ka dambeeya?

2: Maxay dawladdu samayn kartaa si ay u hakiso hoos u dhaca iyo hoobashada dhaqaale?

3: Sidee shaqo la'aanta iyo baagamuuddanimada looga hortagaa?

2: Dhaqaalaha hoose (microeconomics)

Farcan oo ah laanta labaad ee laamaha cilmiga dhaqaalaha ayaa wuxuu deraaaseeyaa hab-dhaqanka sabaartayaasha dhaqaale ahna gucumada abuura giraanta kuwaas oo kala ah ashkhaasta , guryaha, jiritaannada ganacsi iyo hay'adaha. Faracani wuxuu si gaar ah u deraaseeyaa dariiqooyinka kala duwan ee ay isticmaalaan isirrada suuqa ku loollamaya iyo hannaanka ay suuqa ula falgalaan. Dhaqaalaha hoose wuxuu isku taxallujiya in uu halbeeg iyo hannaan u sameeyo habka jiritaaannada ganacsi waxsoosarkooda u jaangooyaan iyagoo adeegsanaya mabda'a dalabka iyo doojinta ama mabda'a sicir-goynta (aragtida waxsoosaaraha). Labadan mabda' waxay isku xidhaan wershadaha , iibsatada gadeyaasha iyo maalgashatada, isagoo mid waliba dheef ama macaash dhinaciisa ah ka baadigoobaya.

Sicirbararku waa maxay?

Magaca sicirbarar waa laba earay oo la isku sidkay oo kala ah sicir iyo barar, sicirbararku wuxuu inoo tilmaamayaa in si guud ascaarta badeecadaha iyo adeegyadu ay sare u kaceen oo ay intii hore ka sare mareen. Sicirbararku wuxuu keenayaa in awooddii wax gadasho ee bulshada si guud hoos udhac ugu yimaaddo oo badeecadihii iyo adeegyadii ayaa qaali garoobaya, lacagtiina way qiimo beelaysaa.

Culimada cilmiga dhaqaaluhu markay abla-ablaynayaan noocyada sicirbararka iyo qaybihiisa kala duwan, way isku maandhaafeen oo qoloba meel bay ku dhufatay. Qaar ayaa waxay eegaan sicirbararka iyo awooddiisa oo qaabkaas u kala qaybiya, qaar kale waxay eegaan musdambeedka sicirbararka iyo halka uu ka askumay, qolo kalena waxay ka eegaan natiijada ka dhalatay sicirbararka ka dib. Haddii

aynnu si guud u eegno noocyada sicirbararka innga oo ka eegayna mudambeedka iyo raadka uu dhaqaalaha ku reebo ama aynnu ka eegno sicirbararka dhinaca awoodda iyo heerka uu gaadhsiisan yahay waxaa loo qaybiyaa laba nooc:

1: Sicirbarar xad-dhaaf ah(Hyperinflation).

2: Sicirbarar guurguuranaya(Creeping inflation).

Haddii aynnu sicirbararka ka eegno musdambeedkiisa waxaa loo qaybiyaa:

1: Sicirbararka dalabka(demand inflation).

2: Sicirbararka hallabaadka(Cost iflation).

Maxaa keena sicirbararka?

Sicirbararku wuxuu yimaaddaa marka lacag badan lagu raadiyo badeecooyin ama adeegyo badan. Asbaabta sicirbararka keenta aad bay u kala duwan yihiin, qaarkood waxaa sabab u ah masiibo rabbaani ah sida: abaaro iyo roob yaraan kaas oo ay ka dhalanayso waxsoosaarkii beeraha oo yaraada ama duufaanno iyo dhul gariir burburiya isirradii waxsoosaarka dhaqaale oo dhan. Marka ay dhacaan masiibooyin rabbaaniga ahi dalabka ayaa aad u bata , doojintuna aad bay u yaraataa, taas oo keenaysa in ay dadku ku dagaallamaan quudka yar ee markaas la heli karo. Musiibooyinka rabbaaniga ah oo keliya ma aha sababta keenta sicirbararka , ee waxaa sidoo kale jira sicirbarar uu insaanku gacmihiisa ku abuuro waxaa ka mid ah:

1: Maamul xumo, nidaam iyo qorshe la’aan.

2: Musuqmaasuq.

3: Shaqo la’aan baahsan.

4: Ribo iyo dusaar xadhkaha goostay.

Madasha akhriska ee dhigaal.

Dhammaad

W/Q: Maxammed Cali Cabdillaahi.

Buug badan oo PDF ah waxaad ka helaysaa **telegramka: KAYDBOOKS**